

# **Dhexdhexaadintu Waa Shaqaysaa (Mediation Works)**

“Dhexdhexaadintu waxay kuu badbaadisaa wakhti iyo lacag waxayna kuu ogolaataa in aad si firfircoon uga qayb qaadatao xalinta dhibaato aad qabto.”

-Garsoore Stanoch

“Waa hab fiican oo wax lagaga qabto wixii la isku hayo iyadoo ay kula tahay in aad arrinta adigu hogaaminayso.”

-Dacwad ka qayb qaate

“Waxay ku siisaa fursad aad arrimaha kaga xaajooto jawi aan culays badani ku saarayn.”

- Dacwad ka qayb qaate

“Fekrad qaali ah iyo wadda fiican oo aad kaga nabad gasho kharaj dheeraad ah iyo muran & qaylo.”

-Dacwad ka qayb qaate

“Si aad u fiican bay kaaga caawinaysaa in si nadaam ah lagu xalliyo is-afgaranwaaga.”

-Dacwad ka qayb qaate



Fourth Judicial District  
Hennepin County Conciliation Court  
Room 306 Minneapolis City Hall  
350 South 5th Street  
Minneapolis, Minnesota 55415-0926  
612-348-2713

Booqo boggayaga shabakadda:  
<http://www.courts.state.mn.us/districts/fourth>

*Tixgeli*

## **DEXDHEXAADIN**

*Inta aadan dacwada*

*ka diiwaan gelin*

*Maxkamadda*

*dhexdhexaadinta ee*

*Hennepin County*



**Degaabka afraad ee**

**Maxkamadda**

**Degmada**

**Maxkamadda dhexdhexaadina ee degaanka afraad ee degmada Hennepin Waxay kugu dhiirigelinaysaa in aad adeegsato Dhexdhexaadin si aad heshiis uga gaartaan is-af-garanwaagiina.**

### **Faahfaahinta Dhexdhexaadinta**

Marka wax la dhexdhexaadinaayo waxaad la kulmaysaa dhinaca kale (cidda aad is-haysaan) iyo dhexdhexaadiye. Ujeedada kulanku waa in la isku dayo in heshiis aad gaartaan adiga iyo dhinaca kale ee is-afgaranwaagu idinka dhexeeyo. Dhexdhexaadiyuhu ma aha garsoore go'aanna ka gaari maayo dacwadiina, laakiin wuxuu ku caawinayaa dhinacyada is haya sidii ay xal u gaari lahaayeen.

Waxaad la xiriiri kartaa labada barnaamij ee qoran midkood ama qof kale oo wax dhexdhexaadiya ee aad adinku doorateen.

**Faa'idooyinka Dhexdhexaadintu waa:**

Xalka oo si siman looga qayb qaato

Kharaj yar ama kharaj la'aan

Degdeg oo dacwadu u dhamaato

Dhexdhexaadi maalmihii, maqribkii ama Sabti iyo Axad/shaqo ka baaqan meysid

Kulanka waxaa lagu qabannayaa xaafaddaada

Walaac iyo wareer yari

Aan ahayn wax sharciyaysan

**Tusaaleyaal is-afgaranwaa oo adeegsan karo dhexdhexaadinta waa:**

Ganacsi

Heshiisyo/kunturaado

Dayn bixiyayaal iyo dayn qaatayaal

Khasaare gaaray hanti

Looshaqeeya/Shaqaale

Kireeye/Kirayste

## **BARNAAMIJYADA**

### **BARNAAMIJKA** **DHEXDHEXAADINTA** **MINNEAPOLIS**

Wuxuu u adeegaa Minneapolis iyo St. Anthony

Lambarka talefoonka: 612-822-9883

Saacadaha:  
Isniin-jimce 9:00 subaxnimo - 5:00 galabnimo

---

### **BARNAAMIJKA** **DHEXDHEXAADINTA** **WOQOYIGA HENNEPIN**

Wuxuu u adeegaa Woqooyi iyo Woqooyi-galbeed ee Hennepin County

Lambarka talefoonka: 763-561-0033

Saacadaha:  
Isniin-jimce 8:30 subaxnimo - 4:30 galabnimo

---